



Abbaalmarin Lagu Maamuusay Brenda Gordon oo Macallimad Bayoolajiga Ka Dhigta Dugsiga Sarre Cleveland oo Noqotay Macalinka Maadaddaa ugu fiican

Macalimada Brenda Gordon ee Dugsiga Sarre Cleveland ayaa sanadkan loo magacaabay inay tahay macallimadii la siiyey Abbaalmarinta Sanadka Macalinka ugu Wanaagsan Maadadda Bayoolajiga.

Abbaalmarinta waxaa siiyey Ururka Qaran ee Macallimiinta Bayoolajiga, kaasi oo ilaa 1961 lagu abbaalmariyo macalimiinta ugu sareysa gobol kasta.

Waxa ay Gordon la sheegay inay ku muteysatay abbaalmarinta (NABT) in ay barnaamijyadii ay ka qeybqaateen bulshada sida, Barnaamijka Wacyi-galinta Haystack iyo Saaxiibada Mashruuca Dib u soo celinta Oak Bottom, sidoo kale shaqadeedii mashruuca ilaalinta Bacinta Dhediga ee Oregon National Primate Center taasi oo ay keentay fasalada Dhismaha Bani'aadamka qeybihiisa iyo qeybaha la xiriira noolaha.

Gordon waxay ku kortay Hawaii ka dibna waxay jaamacadeedii wax ku baratay Pacific University ee ku taala Forest Grove, halkaasi oo ay shahaadada koowaad ee Sayniska qeybtiiisa Bayoolajiga ku qaadatay iyo Shahaadadda labaad oo ay ku qaadatay wax habka waxbarista. Gordon waxa ay macalimad ka ahayd Dugsiga Sarre ee Cleveland muddo 20 sanno ah, guud ahaan waxay Dugsiyada Dadweynaha Portland ka shaqeysay 22 sanno.

Abbaalmarinteeda waxa lagu siin doonaa shirweynaha ka dhici doona maalinta Sabtida ah St. Louis Mo.

-Mike Tokito